# HANDELSHÖGSKOLAN I STOCKHOLM





Handelshögskolan (Dugsiga Tacliinta Sare ee Ganacsiga) manaahijtiisa heerka koowaad (BS), Business and Economics iyo Retail Management waa laba ka mid ah waxbarashada loogu xiise badan yahay Iswiidhan. Waxay ku siinayaan aqoon aasaasi ah oo wanaagsan ee cilmiga dhaqaalaha iyo gundhig xasilloon noloshaada xirfadeed ee mustaqbalka. Labada manaahijba waxaad ku heleysaa fursado wanaagsan ee aad dibedda uga shaqeysato markaad qalinjebiso ka dib. Ardaydii hore u soo dhigatay Handelshögskolan waxay ka shaqeeyaan shirkado waxsoosaar, wakaalado dowladeed iyo hay'ado caalami ah, Iswiidhan iyo dibedda intaba.

## BUSINESS AND ECONOMICS
3 SANO

Waa manhaj 3 sano soconaya oo ku saabsan dhaqaalaha qaranka iyo dhaqaalaha shirkadaha. Ardaydu waxay wakhtiga waxbarashada barkiisa hore dhigtaan koorsooyin ku taxaluqa labadaas maaddaba. Barka dambase waxay ardaydu doortaan inay in intii hore ka badan dhigtaan maaddada ay gaarka u xiiseynayaan. Koorsooyinka la dhigto waxaa ka mid ah: Suuqgeynta, Xisaabta, Tirakoobka, Maaliyadda, Hoggaaminta, Cilmiga Shuruucda iyo Dhaqaalaha Caalamiga ah. Intaas waxaa u dheer oo ay ardaydu saddexda teeram ee ugu horeeya dhigtaan koorsooyin ku saabsan "Caqabadaha Dunida", kuwaas oo lagu lafagurayo wax kasta laga bilaabo isbeddelka cimilada illaa saboolnimada iyo waxa ay ardaydu mustaqbalka qaban karaan si ay u dhaliyaan isbeddel wanaagsan. Sanadka ugu dambeeya waxaa la isa siiyaa fursad ah in hal teeram wax lagu barto jaamacad dalka dibeddiisa ku taal. Maanta waxaa boosas waxbarasho laga helaa jaamacado wanaagsan ee ku yaal Yurub, Eeshiya iyo Waqooyiga Ameerika. Qalinjebinta ka dib ardaydu waxay noqdaan kuwo laga xiiseeyo suuqa shaqada, hase ahaatee waxay sidoo kale wadan karaan tacaliintooda sare ilaa ay gaaraan heerka mastarka (MS), dabadeedna laga yaabee inay qaataan shahaado diktoor (DS) cilmi dhaqaale. Waxbarashadu waxay ku baxaysaa luuqadda Ingriisiga.

## RETAIL MANAGEMENT
3 SANO

Waa manhaj dhaqaale oo 3 sano soconaya oo diiradda saaraya tafaariiqda. Wadashaqayn dhow ayaa ka dhexeysa shirkado wax ku iibiya dukaamo iyo internet.Tusaale ahaan H&M, IKEA iyo ICA. Muddada ay waxbarashadu socoto ardaydu xiriir badan ayey shirkado la yeeshaan, iyadoo ardaydu ay halkaas tagaan oo tijaabiyaan inay xalliyaan caqabadaha rasmiga ah ee shirkadaha la soo dersa. Inta badan waxbarashadu waxay ku socotaa hannaan aqoon isweydaarsiyo (workshops) kooxo yaryar ah oo ardayda ay hagayaan tababarayaal ka hawlgala kulliyadda oo takhasus gaar ah u leh arrimaha horumarinta xirfadda iyo waxbarashada. Koorsooyinka la dhigto waxaa ka mid ah: Suuqgeynta, Iibka, Xisaabcelinta, Xisaabta, Cilmiga Shuruucda iyo Hoggaaminta. Qalinjebinta ka dib ardaydu waxay noqdaan kuwo laga xiiseeyo suuqa shaqada, hase ahaatee waxay sidoo kale wadan karaan tacaliintooda sare ilaa ay gaaraan heerka mastarka (MS), dabadeedna laga yaabee inay qaataan shahaado diktoor (DS) cilmi dhaqaale. Waxbarashadu waxay ku baxaysaa luuqadda Ingriisiga.

## NOLOSHA ARDAYNIMADA

Handelshögskolan wuxuu ku yaal bartamaha magaalada Stockholm, wuxuuna soo-jiray illaa iyo 1909. Arday ahaan, waxaa fursad laguu siinayaa inaad xubin firfircoon ka no-qoto ururka ardayda, kaas oo aad ka heli karto wax waliba oo u dhexeeya waxyaalo ay ka mid yihiin xiriir shirkado illaa iyo munaasabado isdhexgal bulsho iyo kooxo isboorti. Arday ka kala timid adduunka oo dhan ayaa ku mideysan inay wax ka bartaan Handelshögskolan.

## MAXAA DHACAYA QALINJEBIN KA DIB?

95% ardayda BS ayaa 3 bilood gudahood shaqo ku hela markay qalinjebiyaan ka dib. 5% kale waxaa ku jira arday aannan ku talogalin inay shaqo raadsadaan isla marka ay qalinjebiyaan.

Celceliska mushaarka ugu horeeya ee uu qaato arday soo dhammeeyey waxbarasho 3 sano ah waa 35 000 SEK bishiiba. 13% ardaydu waxay shaqadooda ugu horeysa ka helaan Iswiidhan dibeddeeda.

Handelshögskolan i Stockholm · Sveavägen 65 · Box 6501 · 113 83 Stockholm
Telefon 08 - 736 90 00 · info@hhs.se · www.hhs.se

# KANDIDATPROGRAM (BSc)

## SIYAABO KALA DUWAN OO LOO DALBADO WAXBARASHADA HANDELSHÖGSKOLAN

**1.DHIBCO**
Ku dalbo dhibcahaaga dugsiga sare. Haddaad ku dalbaneyso dhibcahaaga caadiga ah waxaad ka mid tahay qaybta "BI", haddaad dhibcahaaga kordhisay qalinjebintaadii dugsiga sare ka dib waxaad ka mid tahay qaybta "BII". 5-tii sano ee ugu dambeeyey waxay dhammaan ardayda dhibcahooda lagu qaatay ay isku celcelis heysteen 19.0 dhibcood, halka ay darajada ugu sarreysa tahay 20.0 dhibcood.

**2. IMTIXAANKA TACLIINTA SARE**
Imtixaanka fahamka akhriska ee luuqadaha Iswiidhishka iyo Ingriisiga iyo imtixaanka xisaabta kuwaas oo la qaado gu'gii hal mar iyo dayrtii hal mar. Iska diiwaangeli imtixaanka bogga hogskoleprov.nu

**3. XEELDHEERI KHAAS AH**
Ma ku dadaashay oo ma ku guulaysatay wax wakhti badan kaa qaatay oo ka baxsan waxbarashada iskuulka? Markaa Xeeldheeridaas Khaaska ah waxay noqon kartaa wax laguu tixgeliyo. Xeeldheerida waxaa tusaale ahaan ka mid ah isboortiga, muusigga ama abaabul shirkad horumartay muddadii dugsiga sare la dhiganayey (UF).

**4. XULASHO GAAR AH**
Waxaad marka hore ku dalbaneysaa CV-gaaga iyo warqad aad ku qeexeyso sababta aad u dooneyso waxbarashada Handelshögskolan. Dabadeed waxaa ku xiga imtixaan lagu ogaanayo awooddaada fikir, waxaana lagu soo gunaanadayaa wareysiyo. Isku diyaari imtixaanka nidaam online ah ee loo maro "Cambridge Thinking Skills Assessment".

## SHURUUDAHA LAGU HELO WAXBARASHADA BUSINESS & ECONOMICS

Manaahijta Dugsiyada Sare ee la ictiraafsan yahay:
- Cilmiga sayniska
- Farsamada (+xulashada Luuqadaha casriga ah)
- Dhaqaalaha (+xulashada Xisaabta heerka 3b)
- Cilmiga bulshada (+xulashada Xisaabta heerka 3b)
- Fanka iyo farshaxanka (+xulashada Xisaabta heerka 2b iyo 3b)
- Dhaqanka iyo luuqadaha (+xulashada Xisaabta heerka 2b iyo 3b)

Koorsooyinka soo socda waxaa la iska rabaa ugu yaraan darajada C:
- Kooraska koowaad ee cilmiga bulshada
- Kooraska koowaad ee taariikhda
- Luuqadaha casriga ah, tallaabada 3aad (Sida Isbaanishka/Fransiiska/Jarmalka) ama afka-hooyo tallaabada 1aad+2aad
- Kooraska labaad ee af-Ingriisiga
- Kooraska saddexaad ee xisaabta
- Kooraska saddexaad ee af-Iswiidhishka

Iyadoon loo eegin dariiqa aad dalabka u mareyso waxaa shardi ah iney isku celceliska dhibcuhu ugu yaraan noqdaan 17.0, halka tiradu ay u dhexeyso 10.0 ilaa iyo 20.0 (iyadoon dhibcaha xeeldheerida lagu darin).

## SHURUUDAHA LAGU HELO WAXBARASHADA RETAIL MANAGEMENT

Manaahijta Dugsiyada Sare ee la ictiraafsan yahay:
- Cilmiga sayniska
- Farsamada
- Dhaqaalaha (+xulashada Xisaabta heerka 3b)
- Cilmiga bulshada (+xulashada Xisaabta heerka 3b)
- Fanka iyo farshaxanka (+xulashada Xisaabta heerka 2b iyo 3b)
- Dhaqanka iyo luuqadaha (+xulashada Xisaabta heerka 2b iyo 3b)

Koorsooyinka soo socda waxaa la iska rabaa ugu yaraan darajada C:
- Kooraska koowaad ee cilmiga bulshada
- Kooraska koowaad ee taariikhda
- Kooraska labaad ee af-Ingriisiga
- Kooraska saddexaad ee xisaabta
- Kooraska saddexaad ee af-Iswiidhishka

Iyadoon loo eegin dariiqa aad dalabka u mareyso waxaa shardi ah iney isku celceliska dhibcuhu ugu yaraan noqdaan 17.0, halka tiradu ay u dhexeyso 10.0 ilaa iyo 20.0 (iyadoon dhibcaha xeeldheerida lagu darin).

"Waan ku faraxsanahay doorashadayda waxbarasho ee Handelshögskolan. Waxaan hadda fursado wanaagsan u leeyahay horumar xirfadeed, Iswiidhan gudeheeda iyo dibeddeedaba."

– Sadia

## KA DALBO WAXBARASHADA: WWW.ANTAGNING.SE

## NALA SOO XIRIIR

Su'aalaha ku saabsan waxbarashada, shuruudaha ama nidaamka lagu helo waxbarashada, kala xiriir: antagning@hhs.se ama telefoon: 08-7369000. Faahfaahin dheeraad ah: hhs.se

APSIA EFMD EQUIS ACCREDITED PRME PIM Partnership in International Management CEMS